

Ma xubneey soo dooran mise xoolo ?!!!

Inkastoo xirfad ahaan aan dhinaca saxaafadda ka soo jeedo, hadana in badan qalinka iyo warqadda isma saarin. Balse waxaad moodaa haatan in la gaaray xilligii loo baahnaa in la muujiyo waxyaabaha dhibaatooyinka raagay ku noqday in dalkii Soomaaliya loo yiqiin uu mar kale lugihiisa dib isugu taago. Soomaalidu waxay tiraahdaa ” **balaayo kaa maqan looma yeerto** ”. Waxaan u soo joogay xilligii barisamaadkii iyo dowladnimada Soomaaliyeed, inkastoo musuqmaasuq, isdabamaryayn, kaligiis talinimo iyo dhibaatooyin maamul jireen, haddana dadka iyo duunyaduba waa ay dhaqnaayeen, kala danbaynta iyo howl-kala socodku waa jireen, dowladnimada iyo haybaduna waxay ahayd mid dunida laga aqoon sanyahay, baarlamaan iyo golayaal dowladeed oo shaqeeyana waan lahayn. Mar qura ayaanu balaayo u yeeranay oo Alloow na dhaafi xaalka aynu niri , laakiin wax khayr noogu bedel malaha waan ilownay inaan ku Alla barino. Waxaan dhinac marnay xikmadii soomaalida lagu yiqiin.. reer miyiga soomaaliyeed oo noloshoodu roobka ku xiran tahay ayaa markay eebbe roob ka baryayaan ku ducaysan jiray ”**Alloow roob kheyr qaba ayaan kaa barinay, mid aanaan calayskiisana wax ku mayrin, cagaarsiina wax ku oodin** ”, taasoo xikmada ka danbaysaa ay ahayd ” Alloow waxaan kaa barinay roob aanaan calaska xareediisa ku daahirin meydad dadeed oo uu naga laayo, cagaarka uu soo saarana aanaan qabriyo dadeed ku oodin”!!! armaan laga ducaysan ama laga fikirin sharka iyo nuqsamaha ay dabada ku wadatay dowlad la’aanta iyo qaran taagan oo la burbursho, armaan gees marnay nusqaantii reer miyigu ka reebeen roobdoontiisa, baryadauna ay ku ekeyd uun Alloow kuwaan na dhaafi ” Alloow roobe roobeey, Alloow dowladan iyo dhibkeeda, maruun dhaayaha noo saar iyadoo la dhalandhooliyay...

Haatan xaaladda aan ku jirnaa isweydiin ma leh : Dad iyo duunyaba way baaba’een, kala danbaynina way dhimatay oo xitaa waxaad ka garan kartaa Culimada diinta oo soomaalidu ay waligoodba aad u qadarin jirtay in arinkooda la fududaystay oo waataa culimadii oo la caayayo si indha la’aan ah loogu been abuuranayo, bal intaas laguma ekeyne waxaaba loo dhigay qaacido cusub oo oranaysa ” Al-qaatilu mujaahid wal Maqtuulu shahiid”, taasoo ah fasaad hor leh oo ku dhiirigalinaysa dhalinta la maran habaabinayo in dilka culimadu yahay mid iska fudud oo waliba lagu jano tagayo. Howlihii kala socday ee dalkuna waaba istaageen, dowladnimadii iyo haybaddii aan dibadda ku lahayna dhimatay oo waataas maanta nin kasta oo doonaya inuu shacabkiisa uga digo inaanu dalku burburin waxaa uu yiraahdaa” **war hooy yaanaan sida Soomaaliya noqonin** ” iyo ” **ma doonayo in dalkaygu Soomaaliya noqdo**”. Waa ayaan daro iyo calool xumo inaan maalin walbaa aragno tilmaamahaas xun ee na lagu soo tusaale qaadanayo. Mararka qaarkoodna waxaaba qarran iyo ciil kuugu filan in dalalka qaarkood tusaalaha nagu soo qaadnaya, markii aan dowladda ahayn ay anaga nagu hoos noolaayeen, oo waliba dunidana aan si wayn looga aqoon.

Baarlamaankii iyo golayaashii dowladnimo iska daa in ay shaqeeyaane, waxay noqdeen golayaal lagu legdamo, la isku caayo, qandaraasyada lacageed ee ka kala imanaya ragga

sheeganaya madxtinimadana lagu kala qaybsado, taasoo ujeedadu tahay in nin walbaa uu helo cid isaga ugu shubta ama u sacab tunta.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa ” **Xooluhu urtay isku fahmaan, dadkuna hadalka**”, in badan waxaan isweydiiyay war kuwani xitaa xoolaha miyey ka liitaan, waayo ur iyo hadal midna iskuma fahmaan!, haddana waxaa markiiba ii soo baxday in ay yihiin xarfaan aan intaas midnaba qadarin oo u baratay in kiishka doolarka ay gacanta hoos dhigtaan oo hadba qofkii wax siiya ay daba ordaan. Waxaase taa ka cajiib badan in mar kasta oo ay isgaraacaan in kuwii ay ku sheegeen in ay nabada iyo kala danbaynta ilaalinayaan ay dusha ka daawadaan, bal xitaa kuwa sida sharci darada ah fadhiyada u qabsanaya aanay ka joojin, oo markii ay ilkaha iska daadiyaan, qaarna laga dhiijiyo dhiiga ay kala qabtaan.

Haddaba kuwaasi aan soo sheegnay waagii waa ku baryay oo aakhirkiina xitaa kuwii doolarka siinayay ayaa u heeshiiyay oo waxaa soo dhow xilligii la kala diri lahaa. Inkastoo waxa soo socda oo lagu bedelayo ay wali tabtii hore ku socoto oo casharka macallin Mahiiga uu la mid yahay kii Walad Cabdalla (Balo iyo 4.5) oo aan wax sidaasi ka duwan kuwii hore laga filayn, haddana ummaddu haatan quus ayay taagan tahay oo waxay ka maraysaa mar uun Alloow wax dowladnimo u eg na sii (waloow aad moodo wali khayrkii in lagu ducaysto uu afka ka maran yahay, oo xikmadii roob doonta ee reer miyiga la gees marsan yahay). Waxaase is weydiin mudan waatan la yiri qolo walbaa ama beel walbaa iyadaa soo dirsan doonta ciddii baarlamaanka u matali lahayde, Toloow ma xoolo ayay soo dooran mise xubno? Waa su'aal da' weyn oo madaxa daalinaysa, una taallo jawaabteeda beelaha la yiri wax soo doorta. Mise waxayba keeni doonaan kuwo xitaa xoolaha ka liita oo aan ur iyo hadal toona isku fahmin. Waxaabase ka sii naxdin daran in ay keenaan kuwo xitaa aan doolarka isku fahmin!!! .

Haddaba waxaan leeyahay waxaa la joogaa xilligii umadda Soomaaliyeed la kala qaybsan lahaa inta u hartay ee dal iyo dad ahba. Allaha u naxariistee Aadan Buulle oo dhowrsano ka hor anagoo goob xaflad ciideed oo magaalada Espoo ee Finland wada joogna, ayaa waxaa la isku soo qaaday Soomaaliya iyo waxa laga damacsan yahay, kolleey waa nin in badan siyaasadda ku soo dhex jiraye wuxuu yiri : war heedhahaya Soomaaliya wali wixii laga damacsanaa lama gaarin, inta ay ka soo diyaarsanayaan dadkii ay u dhiiban lahaayeendalka iyo duunyadaba, riwaayadan ayay sii wadi doonaan marba qof u dhiib iyo marba qolo qolo ka hor keen, laakiin maalinkay is yiraahdaan haddaad gaarteen dantiinii ayay sida Liberia halmar cid xaaqi doonaan oo dadkay rabaan xoog ugu dhiiban doonaan”. Hadda tiibaa muuqata oo wali riwaayaddii kana siib kana saar ee isku bedelka ragga way socotaa, qolo qolo ka horkeena waa la wadaa, laakiin tii Allena meel bay taallaa, iyadanaa xoog badin, waxaase nalaga rabaa intaan caqli yeelano oo hurdada iyo mala awaalka ka baxno, aan gacmaha isqabsano oo u soo jeesano danteena. Dadka ugu horeeya ee umadda khayrka u horseedi karana waa culimada oo laga danbeeyo, balse inta dhalinyaro, siyaasiyiin, hooyooyin, ururo bulsho ay dadka ku hor gaardinayaan, culimadiina la dhinac marayo, wallee inaan khayr iyo horumar la gaarayen.. ee Soomaaliyeey runta u soo noqda oo xubno iyo xoolo kala doorta.

Waxaa Qoray C/rasaaq Sugulle Maxamed